

FAAFIN



RASMI AH

الرسمية

الجريدة

لجمهورية الصومال الديمقراتية

Sannadka 4aad

Muqdiis 1 Oktoobar 1976,

L 10

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka.

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهريّة

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaliga
 gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu
 ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba
 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga al-
 — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN
 BOGGA KOOWAAD
 SHARCI
 BOGGA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA 27. Feb. 74.

Dhismaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliilta Sare L. 89

DECREE OF PRESIDENT S.R.C. 27.2.74 Organisation
 and Establish. of M L. 89 » 700

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE K. 16
 Maajo 76, Darajada Hayadda Mashruucyada Bar-
 waqeeynta beelaha Danwadaagaha L. 90 » 705

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE K. 20,
 Juunyo 76, Xeerka Habeynta Dhismaha Qaabka Ha-
 yadda Mashruucyada Barwaqaynta Beelaha Danwa-
 daagta L. 91 » 705

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Xasan Nuur Xasan L. 342	Bogga	718
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Bashiir Ibraa. L.343	»	719
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Axmad Jaamac Xasan L. 344	»	720
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Axmad Jaamac Xasan L 345	»	721
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Maxamad Cali Faarax L. 346	»	722
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Cabdi Camalow L. 347	»	723
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naado Dhul, Jaalle Xaliimo Sheekh Ibraahim L. 348	»	724
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Aw Axmad Ibraahim L.349	»	725
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naado Dhul Jaalle Shariif Muumim Shariif Nuur L. 350	»	726
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Faarax Cabdi L.351	»	727
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Cali Cabdi Camalow, L.352	»	728
WASAARADDA HAWLAHA GUUD 27 Set. 76, Bedde- laad Naada Dhul Jaalle Ardo Dirir Cusmaan L. 353	»	729
MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA 1 Juulyo 76, Lumid Jeegga wareega Lam. 097502 Sh. SO. 10.000 ay leedahay Dahabo Rooble Cawaacl L. 353/Bis	»	730

BOGGA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA G. S. K. 27 Feb 74, Habka iyo Dhismaha
Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare L.89

G. C. K.

ASAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee kacaanka
iyo Sharciga lam. 1 ee 21 Oktoobar 1969.

ASAGOO ARKAY: Shuruudaha Sharciga lambarkiisu yahay 14,
soona baxay 3 Juunyo, 1962kii, kuna saabsanaa dhismaha Dawladda
iyo wax ka beddelka la xiriira.

IYADOO LA TIXGELINAYO Baahida loo qabo dhidib uaaska
iyo dhismaha Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare ee dhawaan la
abuuray.

MARKII LA ARKAY: Taloooyinkii guddigii Golaha Xoghayaya-
shu u xilsaaray inay uu soo baaraan talana ka soo dhiibto dhismo Wa-
saarooyin iyadoo la tixgelinayo baahida maanta taagan.

AYADOO UU KALA TALIYEY Xoghayaha Dawladda ee Hidda-
ha iyo Tacliinta Bare.

WUXUU GUDDOOMHYEY

Qod. 1aad

Dhismaha iyo darajooyinka jagooyinka Wasaaradda Hiddaha iyo
Tacliinta Sare iyo Xafiisyada la xiriira ayaa halkan loo soo habeeeyey
sida ka muuqata tusaha ku lifaaqan Sharcigan oo uu ka midka yahay

Qod 2aad

Xeer kasta oo ka hor jeeda shuruudaha sharcigan waa reeban ya-
yahay.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka hadda laga billaabo waxa
rasmi ahaan loogu biirinaya sharciyada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga
Soomaaliya.

Waxaara lagu qorayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho; 27.2.1974

*Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka
(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*Xoghayaha Dawladda ee Hiddaha iyo
Tacliinta Sare Maxamed Aadan Shiiikh*

Dhismaha iyo Meelaha Shaqada ee Waaxyaha Wasaaradda Hiddaha iyo
Tacliinta Sare

Meel kasta Qaybaha Wasiiradda Qaybaha Darajoyinkà
Lambarkeeda Waaxyaha ee Wasaara.

Xafiiska Wasiirka

20-0001	Wasiirka wasaa.H. & T. Sare	Maamul	A	1
20-0002	Lataliye Wasiir	»	A4	1
20-0003	Xafiis. Xiriirkha Dadweynaha	»	A5	1
20-0004	Makiinad Garaace	Karaani	C	1
20-0005	Adeege	»	D	1

Xafiiska Agaasimaha Guud

20-1001	Agaasimaha Guud	Agaasim	A2	1
20-1002	Makiinad Garaace	»	C9	1
20-1003	Adeege	»	D	1

Waaxda Tacliinta Sare

20-2001	Agaasime	Aqoonyahan	A3	1
20-2002	Qaybia Dhaqanka	Maamul	A4	1
20-2003	Xafiiska Jaamacadda	Aqoonyahay	A5	1
20-2004	Xafiiska Kulliyadaha	»	A5	1
20-2005	Xafiiska Xiriirkha Dhaqanka	»	A5	1
20-2006	Xafiiska Waxba. Deeqda Dibed	»	A6	1
20-2007	Xafiiska Fulinta Shaqada	Fuliye	B	1
20-2008/9	Makiinad Garaacayaal	Garaal/1	C	2
20-20010/11	Adeegalaal	Adeeg/1	D	2

Waaxda Dhaqanka

20-3001	Agaasime	Aqoonyahan	A3	1
20-3002	Qeyb. Mektabada & Museemyada	»	A5	1
20-3003	Qaybta Cayaaraha ummadda	»	A5	1
20-3004/6	Makiinad Garaacayaal	Garaa/1	C	3
20-3007	Adeege	Adeege	D	1

Waaxda Qorshaha, Baarista

Cilmiga iyo Idiloojiyada

20-4001	Agaasime	Aqoonyahan	A3	1
20-4002	Qaybta Qorshaha	»	A5	1
20-4003	Qaybta Baarista Cilmiga	»	A5	1
20-4004	Qaybta Idiyoolojiyada	»	A5	1
20-4005	Xafiiska Tirakoobka	»	A	1
20-4006	Xafiiska Fulinta Hawlaha	Fuliye	B	1
20-4007/8	Makiinad Garaacayaal	Garaa/1	C	2
20-4009/10	Adeegayaal	Adeeg/1	D	2

Waaxda Maamulka

20-5001	Agaasime	Maamulyaqaan	A3	1
20-5002	Qaybta Shaqaalah	»	A5	1
20-5003	Xafiiska Xisaabaadka	Xisaabiye	B7	1
20-5004	Xisaab Fuliye	Fuliye	B7	1
20-5005/6	Farsamayaqaano	Far/qaano	B	2
20-5007	Xafiiska Fulinta Hawlaha	Fuliye	B	1
20-5008	Makiinad Garaace	Karaani	C	1
20-5009	Adeege	Adeege	D	1

Qaybta Unesco

20-6001	Qaybta Unesco	Aqoonyahan	A5	1
20-6002	Xafiiska Fulinta Shaqada	Fuliye	B	1
20-6003	Makiinad Garaace	Karaani	C	1
20-6004	Adeege	Adeege	D	1

Museenka Ummadda

20-7001	Agaasime	Aqoonyahan	A3	1
20-7002	Qaybta Baarista	»	A5	1
20-7003	Qaybta Bandhigga	»A5	A5	1
20-7004	Qaybta Kacaanka	Maam/qaan	A5	1
20-7005	Qaybta Fanka	Aqoonyahan	A5	1
20-7006/10	Af-celiyayaal	Turjubaano	B7	5
20-700/11	Xafiiska Xisaabaadka	Xisaabiye	B7	1
20-700 12/14	Makiinad Garaacayaal	Karaan/aal	C	3
20-700 15/24	Adeegayaal	Adeegayaal	D	10

Magtabadda Ummadda

20-8001	Agaasime	Aqoonyahan	A3	1
20-8002	Lataliye	Maamulyahan	A4	1
20-8003/4	xafii. kutubta & buugyaqaanno	Aqoonyahano	A	2
20-8005/6	Taageerayaal	Fuliyayaal	B7	2
20-8007/8	Fuliyayaal	Fuliyayaal	B	2
20-8009/14	Ku xigeen buugyahanno	farsa/yaqno	C9	2
20-800 15/16	Makiinad Garaacayaal	Garaa/aal	C	2
20-800 17/22	Adeegayaal	Adeegayaal	D	6

Akeedimayadda Dhaqanka

20-9001	Agaasime Guud	Maamu/qaan	A2	1
20-9002	Guddoomiyaha Af-soomaaliga	Aqoonyahan	A3	1
20-9003	Qaybta Afafka iyo dhaqanka	»	A5	1
20-9004	Qaybta Taariikhda	»	A5	1
20-9005	Qaybta Sugaanta Bulshada	Aqoonyahan	A5	1
20-9006	Qayb. Deggaanka (Geagraphy)	»	A5	1
20-9007	Qaybta Maamulka	Maamul	A5	1
20-9008/18	Xafiiska Baarista	Aqoonyahan	A6	11
20-900 19/28	Baarayaal	»	A	10
20-90029	Xafiiska Shaqadla	Fuliye	B7	1
20-9030	Xafiiska Xisaabta	Xisaabiye	B7	1
20-9031	Xafiis. xoogh. Gud. af-Soomaa.	Maamul/qaan	A	1
20-9032/41	Ku xigeenno Baare	Fars/yaqaano	B7	10
20-9046/49	Xafiiska fulinta shaqada L.1	Fuliyayaal	B9	4
20-9050/59	Xafiiska fulinta shaqada L.11	»	B	10
20-9060/66	Adeegayaal	Adeegayaal	D	7

QAABKA DHISMAHA IYO MEELAHA WAAXYAH
WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE

Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare	A2	A3	A4	A5	A6	A	A	B7	B9	B	B	C9	C	C	D	Meelaha oo dhan	Tiraguud	
Xafiiska Agaasimaha Guud		1					3								1	1	1	5
Xafiiska Wasarka			1	1		1	1							1		1	1	3
Waaxda Tacliinta Sare	1	1	3	1			6			1	1			2	2	2	11	
Waaxda H. iyo Dhaqan.	1			2			3						3	3	1		7	
Waaxda qorsaha Baarista																		
Cilmiga iyo Idiyoolojiyada	1			3		1	5			1	1			2	2	2	10	
Waaxda Maamulka	1				1			2	2		3	5		1	1	1	9	
Qaybta Usenco						1			1		1	1		1	1	1	4	
Muscemka Ummadda	1				4			5	6			6		3	3	10	24	
Maktabadda Ummadda	1	1		1		2	4	2		2	4		6	2	8	6	22	
Akadeemiyaha Ddaqan.	1	1			5	11	11	29	12	8	10	30	—	—	7	66		
Isu-shaqada waaxyaha	2	7	3	20	12	15	59	22	8	18	48	7	15	22	32	161		

DECRETA OF THE PRESIDENT S. R. C. 27.2.74 Organization and Establishment of Ministry of Culture and Higher Education N.89.

PRESIDENT

HAVING SEEN: The First and Second Charter of the Revolution and Law No. 1 of 21 October 1969;

HAVING SEEN: The provisions of Law No. 14 of 3 June 1962 on the Organisation of the Government and subsequent amendments;

CONSIDERING: It necessary to fix the organisation and establishment for the newly created Ministry of Culture and Higher Education;

HAVING SEEN: The recommendation of the Committee on Establishments set under the auspices of the Council of Secretaries to examine proposals in relation to organisations and establishments of Ministries according to current needs;

ON THE PROPOSAL: Of the Secretary of State for Culture and Higher Education;

DECREES

Article 1

The establishment and the gradings of the posts of the Ministry of Culture and Higher Education and its dependent offices is established herein as shown in the Schedule attached to this decree, of which it forms an integral part.

Article 2

Any Regulation contrary to the provisions of this Decree is hereby repealed.

Article 3

This Decree shall enter into force immediately. It shall be included in the Official Compilation of Laws and Decrees of the Somali Democratic Republic and shall be published in the Official Bulletin.

Mogadiscio, 27.2.1974

President Supreme Revolutionary Council
(Jaalle Maxamad Siyaad Barre)

(Dr. Maxamad Aadan)
Ministry of Culture Higher Education

VISTO E REGISTRATO
Beg N. 1 Foglio 21 Mogadiscio il 13
Mar.1974 il Magistrato Ai Conti
MAG. Cabdullaahi Warsame Nuur

ORGANISATION AND ESTABLISHMENT — MINISTRY OF CULTURY AND HIGHER EDUCATION.

Posisiin No.	Organisation & Post	Classification Gde Estab	
Office of The Secretary of State			
20-0001	Secretary to secretary of state	Administrative	A 1
20-0002	Counsellor	Administrative	A4 1
20-0003	Public Relations Officer	Administrative	A5 1
20-0004	Clerk/Typist	Clerical	C 1
20-0005	Messenger	Unclassified	D 1
Directorate General			
20-1001	Director - General	Administrative	A2 1
20-1002	Personal Secretary	Clerical	C9 1
20-1003	Messenger	Unclassified	D 1
Higher Education Department			
20-2001	Director	Professional	A3 1
20-2002	Cultural Attache	Administrative	A4 1
20-2003	Head if University Service	Professional	A5 1
20-2004	<i>Head of higher institution service</i>	Professional	A5 1
20-2005	head of cultural relations service	Professional	A5 1
20-2006	Head of Scholarship Section	Professional	A6 1
20-2007	Executive Officer	Executive	B 1
20-2008/9	Clerk/Typist	Clerical	C 2
20-2010/11	Messenger	Unclassified	D 2
Cultural Department			
20-3001	Director	Professional	A3 1
20-2004	<i>Head of higher institution service</i>	Professional	A5 1
20-3003	head of folklore Service	Professional	A5 1
20-3004/6	Cleark/Taypist	Clerical	C 3
20-3007	Messenger	Unclassified	D 1

PLANNING SCIENTIFIC & IDEOLOGICAL RESEARCHI DEPARTMENT

20-4001	Director	Professional	A3	1
20-4002	Head of planning Service	»	A5	1
20-4003	head of scientific research service	»	A5	1
20-4004	Head of Ideology service	»	A5	1
20-4005	Statistical Officer	»	A	1
20-4006	Executive Officer	Executive	B	1
20-4007 /8	Clerk/Typist	Clerical	C	2
20-4009 /10	Messenger	Unclassified	D	2

Administration Department

20-5001	Director	Administrative	A3	1
20-5002	Head of personnel Service	Administrative	A5	1
20-5003	Senior Accounts Officer	Executive	B7	1
20-5004	Registry Superintendent	Executive	B7	1
20-5005 /6	Technician	Technical	B	2
20-5007	Executive Officer	Executive	B	1
20-5008	Clerk/Typist	Clerical	C	1
20-5009	Messenger	Unclassified	D	1

unesco Service

20-6001	Head of Service	Professional	A5	1
20-6002	Executive Officer	Executive	B	1
20-6003	Clerk/Typist	Clerical	C	1
20-6004	Messenger	Unclassified	D	1

National Museum

20-7001	Curator	Professional	A3	1
20-7002	Head of Research Service	Professional	A5	1
20-7003	Head of Exhibition Service	Professional	A5	1
20-7004	Head of revolution Service	Administrative	A5	1
20-7005	Head of Art Service	Professional	A5	1
20-7006/10	Guide	Executive	B7	1
20-7011	Senior Accounts Officer	Executive	B7	5
20-7012/14	Clerk/Typist	Clerical	C	3
20-7015/24	Messenger	Unclassified	D	10

National Library

20-8001	Head of Library	Professional	A3	1
20-8002	Counsellor	Administrative	A4	1
20-8003/4	Senior Librarian	Professional	A	2
20-8005/6	Auxilliary Officer	Executive	B7	2
20-8007/8	Executive Officer	Executive	B	2
20-8009/14	Assistant Librarian	Technical	C9	6
20-8015/16	clerk/typist	clerical	C	2
20-8017/22	Messenger	Unclassified	D	6

Academy for Somali Studies

20-9001	Director - General	Administrative	A2	1
20-9002	chariman, so. langu. commission	Professional	A3	1
20-9003	head of langu. & culture division	Prifessional	A5	1
20-9004	Head of History Division	Professional	A5	1
20-9005	Head of Social Culture Division	Professional	A5	1
20-9006	Head of Geography division	Professional	A5	1
20-9007	Head of administration service	Administrative	A5	1
20-9008/18	Senior Researcher	Prifessional	A6	11
20-9019/28	Researcher	Professional	A	10
20-9029	Senior personnel Officer	Executive	B7	1
20-9030	Senior Accounts Officer	Executive	B7	1
20-9031	Secretary, So langu. commission	Administrative	A	1
20-9032/41	Assistant Researcher	Technical	B7	10
20-9042/45	Technician	Technical	B9	4
20-9046/49	Executive Officer class I	Executive	B9	4
20-9050/59	Executive Officer, classII	Executive	B	10
20-9060/66	Messenger	Unclassified	D	7

SUMMARY OF BOST BY DIVISION & GRADES — MINISTRI OF CULTURE & HIGHER EDUCATION

Ministry of Culture and Higher Education	A2	A3	A4	A5	A6	Total	B7	B9	Total	C9	Total	Total	Total	Total Posts	
						A					C	C	D		
Office of the Secretary of State			1	1		1	3				1	1	1	5	
Directorate — Generar	1						1				1	1	1	3	
Higher Education Department		1	1	3	1	6			1	1	2	2	2	11	
Cultural Department		1		2		3					3	3	1	7	
Planning, Scientific & Ideological															
Research Department	1		3		1	5			1	1	2	2	2	10	
Administration Department	1		1		2	2			3	5	1	1	1	9	
UNESCO Service			1			1			1	1	1	1	1	4	
National Museum		1		4		5	6		6		3	3	10	24	
National Library		1	1		2	4	2		2	4	6	2	8	22	
Academy for Somali Studies	1	1		5	11	11	29	12	8	10	30		7	66	
Total Posts	2	7	3	20	12	15	59	22	8	18	48	7	15	32	161

Xeer L. 90 ee 16 Maajo 1976.

Darajada Hay'adda Mashruucyada Barwaqeynta Beelaha Danwadaagta.

ASAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

MADAXWEYNAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY: Sharciga Lam. 14 ee soo baxay 9 Maajo 1969 ee ku saabsan dhismaha Hay'adda Mashruucyada Barwaqenta Beelaha Danwadaagta;

ASAGOO ARKAY: Sharciga L. yahay 36 ee 12.4.1972, Amar Xeerkha Lamb. 74 ee 22.4.72 kuna saabsan Wakaaladda Madaxa Bannaan.

ASAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in la tilmaamo Derajada hay'adda kor ku tilmaaman iyadoo la tixgelinaayo kaalinta ay ka qaadanayso hay'addas daryeelidda danaha dadka abaa-ruhu waxyeeleeyeen gaar ahaan horumarinta dhaqaalahooda iyo abuurid-da nolol Bulsho oo ku dhisan Mabaadi'da Hantiwadaagga ah.

ASAGOO DHEGEYSTAY: Talada Guddoomiyaha Gudciga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaqeynta Beelaha Danwadaagta;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerkha soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la gooyay in Hay'adda Mashruucyada Barwaqenta Beelaha Danwaqta la gaarsiiyo Derejada (Category A)

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaan isla markiiba waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 16 Maajo 1976.

GUDDOOMIYAH G. S. K.
(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

WAAN ARAGNAY EE DIIWANGELINNAY

Diiwaanka Lamb. 1 Bogga Lam. 101

Muqidsho, 10 Juunyo 1976.

Hantidhawrka Guud.

G.Ie Dhewe Cabdillaahi Warsame Nuur.

XEER WADAXWEYNAHA G. S.K. ee 20 Juunyo 1976,

Xeerka Habeynta Dhismaha Qaabka Hay'adda Mashruucyada Barwaaqeynta
Beelaha Danwadaagta, L. 91

MADAXWEYNAHA

GOLAH A SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo
Sharcigii 1aad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969,

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 9.5.1976 ee ku saabsa-
raa Abuurista Hey'adda Mashruucyada Barwaaqeynta Beelaha Danwa-
daagta, Qodobka 6aad, xubinta 4aad.

MARKUU ARKAY: Sharciga lamb. 74 ee tr. 22 Abriile 1972 (staff
regulation of Autnomous Agencies) iyo sharciga L. 17 ee tr. 21 Abriile
1974 (Beedelaad sharciga Wakaaladaha Xeer Guddoonshaha GSK);

ISAGOO TIXGELINAAYA: Talada uu soo jeediyey Guddoomi-
yaha Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaaqeynta Beelaha
Danwadaagta.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad'

1. Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Bar-
waaqeynta Beelaha Danwadaagta wuxuu Hay'adda ku yeelan doonaa
awoočda ku tilmaaman Sharciga L. 17 Tr. 21 Abriile 1974, qodobka 1A
tirsiga kowaad iyo sharci L. 14 ee 9.5.1976 qodobka 5aad.

2. Awaamirta Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaa-
qeynta Beelaha Danwadaagta, waxay mar walba ka soo baxeysaa Gu-
ddoomiyaha Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaaqeynta
Beelaha Danwadaagta.

Qodobka 2aad

Hey'addu waxay yeelanaysaa 2 Guddi hoosaad, 6 Waaxood iyo hal
Xoghayn :

1. Guddiga Farsamada ee Maamulka.
2. Guddiga Kormeerka Hawlaha Hey'adda.
1. Waaxda Beeraha;
2. Waaxda Maamulka Guud;
3. Waaxda Qorshaha, Isucuwidda iyo Dhismaha;
4. Waaxda Siyaasadda iyo Bulshada;
5. Waaxda Lacagta iyo Xisaabaha;
6. Waaxda Kallunka.
1. Xoghayn.

Qodobka 3aad

Guddiga Farsamada ee Maamulka

(Commissione Tecnica dell'amministrazione)

1. Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha iyo Guddoomiyaha Kormeerka ee Hey'adda waxay dhisayaar guddiga Farsamada ee Maamulka.
2. Guddiga waxaa isku-duub ahaan (solicite) xil uga saaran yahay fulinta Mashruucyada Hey'adda; wuxuuna tala ka bixin doonaa socodsinta hawlaha guud ee Hey'adda iyo arrin kasta oo uu soo gudbiyo Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaqeynta Beelaha Danwadaagta;
3. Guddigu sannad walba wuxuu ciyaarinayaa miisaaniyadda, dhakhliga, kharajka, faa'iidooyinka ama khasaaraha iyo qaa'imadda (inventario) hantida hey'adda.
4. Guddiga waxaa guddoomiye ka ah Maareeyaha Guud ee Hey'adda oo ugu yaraan bishii laba jeer shir u qaban doona;

Qodobka 4aad

(Guddiga Kormeerka Hawlaha Hey'adda)

1. Guddiga Kormeerka waa xubinta ilaalada iyo Haqtidhowrka gudaha ee Hey'adda; oo ka tirsan Maareeyaha Guud oo ku xusan Sharci L. 14 ee 9.5.1976; qodob. 6aad. Guddigu wuxuu ilaalin doonaa:
 - b) Habka socodsinta hawlaha ee waaxyaha iyo fulitaanka qorshaha Mashruucyada Danwadaagta;
 - t) Heerka nolosha Danwadaagta iyo shaqa gelintooda;
 - j) Madaxda iyo shaqaalaha halwadeennada ka ah Degmooyinka Danwadaagta sida ay xilkooda u gudanayaan;
 - x) Ka warbixinta shaqaalaha Hey'adda;
 - kh) Maamulka Bakhaarrada lagu keydiyo hantida Danwadaagta iyo tan Dawlaaddaba;
 - d) Hubinta iyo la socodka xisaabaadka Hey'adda nooc kasta ha noqdeene;
 - r) Ka warqabka Heshiisyada lala gelaayo Hey'adaha kale ee Dawladda iyo kuwa caalamigaba;
 - s) Ka talinta arrimaha la xiiira sharciga;
 - sh) La socodka fulinta qorshaha Mashruucyada;

- ah) Hubinta Dayactirka qalabka Mashruucyada;
 - c) Qorista Shaqaaalaha Mashruucyada;
 - g) Hantida Hey'adda oo dhan.
2. Guddiga wuxuu xaq u leeyahay inuu arkaa diiwaannada, xisaabaadka Mashruucyada.
 3. Guddigu waa inuu ka sameeyaa degmooyinka Danwadaagta iyo Mashruucyada hubin iyo xaqijjin xisaabeed, ugu yaraan 3dii biloodba mar.
 4. Guddigu wuxuu sameyn karaa kormeer kedis ah, markii uu talo ka helaa labada guddoomiye ee ku xusan 'Qod. 2 iyo 'Qod. 4 tirsiga 4aad ee xeerkan amase midkoodba.
 5. Guddigu oo kormeekiisu saameyn doono hawlahaa Hey'adda iyo Mashruucyada oo dhan wuxuu ku gunnaanadayaa warbixin qoraal li oo uu u gudbinayo Guddoomiyaha Guddiga Farsamada ee Maamulka Hey'adda nuqulna guddoomiyaha Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaaqeeynta Beelaha Dandawaagta.
 6. Guddigu wuxuu yeelan doonaa Xafiis iyo shaqaale u gaar ah;
 7. Guddigu wuxuu u qaybsami karaa guddiyo hoosaad.

Qodobka 5aad

Waaxda Beeraha

Agaasimaha Waaxda Beeraha isagoo u hoggaasan amarka Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaaqeeynta Beelaha Danwadaagta iyo kan Maareeyaha Guud lana kaashnaayo Wasaardda Beeraha xagga farsamada iyo fulitaanka hawlahaa; wuxuu qaabilسانان doonaa hawlahaa Hey'adda loo xilsaaray oo ku saabsan:

1. Fulinta iyo dhaqan gelinta qorshaha Mashruucyada Beeraha ee Danwadaagta;
2. Diyaarinta dhulka, abuurka iyo shafidda beeraha;
3. Diyaarinta qalabka, beeraha iyo agaasinkiisa;
4. Dhismaha keliyada iyo biyo xireennada, waraabinta iyo daryeeka saraca;
5. Dayactirka qalabka beeraha;
6. Hirgelinta dhaqashada xoolaha iyo digaagga;
7. Shaqa gelinta danwadaagta iyo tababarkooda, isagoo ku fulinaaya siidha waaxda qorshaha, isuduwidda iyo dhismaha ee Hey'adda ay u habeysay.

8. Waxna xil gaar ah ka saaran yahay isku xirnaanta maamulka Beelaha Danwadaagta iyo hirgelinta Mashruuca Beeraha.

9. Hirgelinta Mashruuca Beeraha waa inuu noqdaa mid dhaqan geliya dhismaha (organizzazione) Beelaha Danwadaaga, abuurj karana tartan shaqo.

Qodobka 6aad

Waaxda Maamulka Guud

Agaasinka Waaxda Maamulka Guud isagoo u hoggaasan Guiddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaqeynta Beelaha Danwadaagta iyo ka Maareeyaha Guud wuxuu mas'uul ka nooqn doonaa hawlaho hoos ku qoran:

1. Isuduwidda shaqaalaha, habeynta maamulkooda iyo ka xog-warrankooda;
2. Xafidaadda waraaqaha rasmiga ah iyo galayntooda (filing);
3. Habeynta Hawlaho Saadka (logistica) Danwadaagta;
4. Keydinta miraha ka soo baxa Mashruucyada Danwadaagta iyo iib geyntooda;
5. Habeynta Gaadiidka iyo isgaarsiinta Hey'adda;
6. Xiriirinta, iskuduwidda iyo la socodka hawlaho degmooyinka Beelaha Danwadaagta;
7. Amar ka bixinta iyo wax ka qabadka dhibaatooyinka degmoo-yinka Beelaha Danwadaagta.

Qodobka 7aad

Waaxda Qorshaha, Isuduwidda iyo Dhismaha

Agaasinka waaxda Qorshaha, isuduwidda iyo dhismaha isagoo ka amar qaadanaaya Guiddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaqeynta Beelaha Danwadaagta iyo Maareeyaha Guud lana kaashanaaya xagga qorsheynta Wasaaradaafha iyo laamaha Dawladda oo ay khusayso; wuxuu mas'uul ka noqon doonaa hawlaho Hey'adda loo xilsaaray ee ku saabsan:

1. Qorsheynta barnaamijka dhaqaalaha iyo horumarinta Hey'adda iyo Danwadaagta;
2. Habeynta Mashruucyada Danwadaagta iyo dhaba socodka fulitaanka qorshahooda;
3. Qorshaynta iyo fulitaanka dhismaha degaanka danwadaagta;

4. Qoraal ka reebidda (documentation) Mashruucyada Hey'adda fulinayso iyo ururinta warbixinnada iyo tirakoobyada la xiriira;
5. Habeynta Tababarro farsamo kala duwan oo lagu hormarinaayo dadka danwadaagta;
6. Shaqa gelinta khubarada shisheeyaha ah ee Hey'adda u shaqeeya iyo ka warqabkooda;
7. La socodka heshiisyada caalamiga ah oo Hey'adda la xiriira.

Qodobka Saad

Waaxda Siyaasadda iyo Bulshada

Agaasinka Waaxda Siyaasadda iyo Bulshada isagoo raacaya awaa-miirta Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaageynta Beelaha Danwadaagta iyo kan Maareeyaha Guud wuxuu mas'uul ka noqon doonaa hawlaha ku saabsan :

1. Fulinta Siyaasadda Kacaanka iyo abuurista bulshada Danwadaagta cusub ee ku chisan hawl iyo hantiwadaag in kor loogu soo qaado dhaqaalahooda iyo noloshooda ijtimaaqiga ah iyagoo la gaarsiinaayo isku filnaansho buuxda;
2. Hubinta iyo tallaabo ka qaadka barnaamijyada waxbarashada caadiga ah iyo tan dadka waaweyn iyadoo la raacayo habka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ay u qorsheysay;
3. Qabanqaabada tababarrada dadka Danwadaagta;
4. Habeynta xannaanada Kaaha iyo Ubaxa Kacaanka ee Danwadaagta;
5. Horumarinta fanka iyo ciyaaraha isboortiga ee degmooyinka;
6. Hirgelinta dhismaha Guulwadayaasha Danwadaagta iyo shaqadooda;
7. Hirgelinta dhismaha guddiyada degmooyinka danwadaagta, la socodka go'aannada, tala ka bixinta Dhibaatooyinka Bulshada iyo kor u soo qaadka garaadkooda siyaasiga ah ee Danwadaagta iyadoo lala kaashanayo qorshaha Xafiiska Siyaasadda M. G. S.K. oqrshaha Xafiiska Siyaasadda ee MGSK;
8. Tala ka bixinta abaalmarinta iyo dallacaadda shaqaalaha degmooyinka Danwadaagta;
9. Qorista shaqaalaha looga baahdo Mashruucyada Danwadaagta;
10. Daryeelka Caafimaadka danwadaagta, ka hortagga cudurrada iyo maamulka guud ee cisbitaallada Danwadaagta;

Qodobka 9aad

Waaxda Lacagta iyo Xisaabaadka

Agaasinka Waaxda isagoo raacaaya amarka Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaqaqeynta Beelaha Danwadaagta iyo kan Maareeyaha Guud wuxuu mas'uul ka noqon doonaa:

1. Habeynta miisaaniyadda kharajka caadiga ah ee Hey'adda iyo kan Mashruucyada Barwaqaqeynta Beelaha Danwadaagta;
2. Mushaharka shaqaalaha iyo gunnadooda;
3. Xisaabaadka Mashruucyada Barwaqaqeynta Beelaha Danwadaagta iyo hubintooda;
4. Kharajka abaalmarinta iyo qiimeyn ta shaqada dadka danwaaqta ka tirsan;
5. Kharajka caadiga ah ee Danwadaagta iyo hubintiisa;
6. Xafidaadda iyo habeynta diiwaannada xisaabaadka Hey'adda oo dhan.

Qodobka 10aad

Waaxda Kalluunka

Agaasinka Waaxda Kalluunka isagoo raacaaya amarka Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaqaqeynta Beelaha Danwadaagta iyo kan Maareeyaha Guud lana kaashanaayo Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadoodka Ba'da xagga farsamada (tecnica) iyo fulitaanka hawlahaa; wuxuu mas'uul ka noqon doonaa:

1. Fulinta mashruuca kalluunka ee degmooyinka danwadaagta Kalluumeysatada.
 2. Isagoo raacaaya qorshaha Hey'adda.
- B. Hirgelinta mashruuca dhismaha degmooyinka Kalluumeysatada iyo iyo agaasinka qalabka u gaarka ah ee dhismaha.
- T. Tababarka xirfeyn ta danwadaagta Kalluumeysatataa;
 3. Dayacairka qalabka Kalluumeysigaa, agaasimiddiisa iyo iaalintiisa;
 4. Kaydinta iyo suubinta kalluunka iyo la socodka maamulkiisa.
 5. Waxaa xil gaar ah ka saaran isku xirnaanta maamulka Beelaha Danwadaagta iyo hirgelinta mashruuca kalluunka;
 6. Hirgelinta mashruuca waa inuu noqdaa mid dhaqan geliya qaabka (organizzazione) dhismaha Beelaha Danwadaagta, abuuri karaa tartan shaqo.

Qodobka 11aad

Qaybaha (Service) waaxyaha

Waaxyaha kor lagu tilmaamay waxay yeelan doonaan qeybo (services) iyo xubno (sections) hoos yimaada sida ku tilmaaman shaxda qaabka Hey'adda oo xeerkan ku lifaaqar; waxayna yeelanayaan shuqaale u gaar ah.

Qeybo iyo xubno kalena waa la dhisi karaa marka loo baahdo.

Qodobka 12aad

Xoghaynta

B. Xoghaynta waxay toos u hoos imaaneyso Maareeyaha Guud; waxayna mas'uul ka noqon doontaa:

1. Fulinta iyo la socodka amarrada Maareeyaha Guud;
2. Fulinta go'aannada Guddiga Farsamada ee Maamulka hey'adda;
3. Hadal qoraalka shirarka Guddiga Farsamada Maamulka;
4. Isuduwidda iyo xafidaadda waraaqaha sirta iyo qarsoodiga ee Hey'adda oo dhan;
5. Habeynta waraaqaha (documents) la xiriira hawlaha Maareeyaha Guud.

T. Guddiga Sare eer Dejinta iyo Mashruucyada Barwaageynta Beelaha Danwadaagta wuxuu yeelan doonaa Xoghayn u gaar ah oo mas'uul ka noqota;

1. Fulinta go'aannada guddiga ay hoos imaanayso iyo gaarsiintooda meelaha ay khuseys;
2. Xafidaadda war-bixinnada guddiyadha.
3. Hadal qoraalka shirarka.

Qodobka 13aad

Hawlaha Degmooyinka

Hay'adda waxaa degmooyinka beelaha Danwadaagta wakiil uga ah socodsinta hawlaha (xagga dhaqan gelinta) guddiyada degmooyinka beelaha Danwadaagta.

Qod. 14

Guddiyada Degmooyinka Beelaha Danwadaagta

1. Guddiyada Degmooyinka Beelaha danwadaagta ka dhisan waa inay ahaadaan ku xubnhiisu ay yihiiin dad garaadkooda Siyaasiga ah uu aac' u sarreeyo, karti iyo aqoon u leh hawlahaa Mashruucyada degmooyinkalaga hirgelinayo.

2. Guddiyadu waa inay ku shaqeeyaan iskuduubnaan; dooc dhisma ah, mujaamala la'aan (franco) oo maamuus iyo is-maqal ku dhisan ku shaqeeyaa, kana fog awood jeclaysi iyo is-muujin infaaqeed (ipucrisia).

Qod. 15

(Xubnaha Guddiga)

1. Guddiga Degmooyinka Beelaha danwadaagta ee guddoomiyahiiisa lagu magacaabayo Xeer Madaxweyne, waxaa xubin ka noqon doona Wakiillada Wasaaradaha iyo Hay'adaha degmooyinkaasi u jooga oo kala ah:-

1. Beeraha ama Kalluumeysiga
2. Waxbarashada iyo Barbaarinta
3. Hawlahaa Guud
4. Caafimaadka
5. Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa
6. Xafiiska Siyaasadda ee M. G. S. K.
7. Ciidanka Booliska
8. Nabadsugiida
9. Shaqac'a iyo Isboortiga
10. Maaliyadda

11. Iyo Beeldaajiyayaasha ka qayb gelaya shirarka caadiga ah.
2. Guddoomiyaha wuxuu tobanka xubnood oo ka tirsan Madaxda Shaqaalaha rasmiga ah, u qaban karaa shirar aan caadi ahayn (riunioni riservate);
3. Shirarka gaarka ah waxaa lagu falangeynayaa arrimaha ku saabsan waayo—aragnimada maamulka, farsamada hawlahaa mashruucyada iyo degaanka ee doorashada Guddiyada danwadaagta.

Qod. 16

(Xoghaynta Guddiga degmada)

Guddiga degmada wuxuu leeyahay Xoghave fulinaaya hawlahaa Xoghaynta, ahna gacan yaraha Guddoomiyaha Degmada oo ka mas-uul ah, isagoo u hoggaansan amarka guddoomiyaha iyo kan Guddiga degmada:

1. Maamulka Xisaabaadka iyo Bakhaarada
2. La socodka Shaqada Beelaha Danwac'aagta;
3. Fulinta awaamiirta iyo ga'aannada Guddiga iyo gaarsiintoo'da meelaha shaqada ku leh;
4. Xafidaadda warbixinnada guddiga;
5. Ha'cal qoraalka shirarka;
6. Ka warqabka shaqada, shaqaalaha iyo xannaanadooda;
7. Xafidaadda qaa'imada (inventario hantida Danwadaagta tan Hay'adca iyo tan Degmada.

Qod 17

(Guddiga Sare ee Nabadgelyada Degmada)

1. Guddoomiyaha degmada, Wakiyka Xafiiska Siyaasadda ee MGSK. Taliyaha Saldhigga Booliska iyo wakiilka Nabadsugid'a, waxay dhisayaan Guddiga Sare ee Nabadgelyada degmada;
2. Guddigan wuxuu gaar ahaan uga shirayaa arrimaha ku saabsan nabadgelyada degmada, warbixinnada shaqaalaha, shaqo bixinta iyo waxyaabaha la xiriira xog—oggalnimada hawlahaa Mashruucyad'a ee degmada.
3. Guddiga Sare ee nabadgelyada degmada wuxuu yeelan karaa madaxda hawlahaa la xiriira arrinta uu falanqaynayo.

Qod 18

(Guddi Hoosaadka maamulka)

1. guddiga maamulka Danwadaagta muxuu isu—qaybinayaa gud-diyo hoose oo noqonaya sida soo socota:-
 - B. Guddiga hanuunirta iyo Waxbarashad'a;
 - T. Guddiga tusaalaha, dhismaha iyo dhireynta degmada;

- j. Guddiga dhaqaalaha iyo Tirakoobka.
 - X. Guddiga nidaamka, Nabadjelyada Baarista iyo aqoonsiga dadka;
 - Kh Guddiga caafimaadka iyo caada baaridda.
 - D. Guddiga horumarinta Tacabka.
2. Guddiyadaasi waxaa madax ka noqonaaya xubnaha ka tirsan guddiga degmada ee shaqaalaha dawlac'da.

Qod. 19

(Bulshada Beelaha Danwadaagta)

- 1. Bulshača danwadaagta waxay ku dhisan tahay wadajir dhaqaale iyo hawl.
- 2. Wuxaan ka mid noqon kara:-
 - B. Dadkii asalka ahay ee laga soo daad gureeyey Xeryihii Garraarka «Abaarta dabatheer» oo si rasmi ah lagu soo dejiyey;
 - T. Qoysaskii loo aqoonsaday in «Abaarta dabatheer» ay si dadban u ceyreysay, kuwaas oo lagu oggolaan karo, si gaar ahaaneed (special case); waa inay leeyihiin dad xoog leh oo tacabka Danwadaagta qayb wax gal leh (attivo) ka qaadan karaan;

j. Waxaa kale oo loo oggolaan karaa in degmooyinka Danwadaagta ay ku biiraan tiuloo yinka yar-yar oo ah agagaarka degmooyinka danwadaagta oo ay deggan yihiin beeraley ama Iskaashatooyin Kalluumeyso.

X. Oggolaanshaha dadka ku tilmaaman xarfaha (t) iyo (j), lambarka 2aad ee qodobkan, waxaa awood' u leh Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaaqaynta beelaha Danwadaagta isagoo tixgelinaaya go'aanka guddiga Sare ee Dejinta iyo M.B.B.D.

Kh. Iskaashatooyin ka gaar ah Danwadaagta lagama cheex abuuri karo, kamana shaqayn karto degmooyinka beelaha Danwadaagta.

Qod. 20

(Guddiyada Bulshada Danwadaagta)

- 1. Bulshada Danwadaagta waxaa maamulaya guddiyo hoosaad oo ka dhisan dacka danwadaagta ka tirsan;
- 2. Guddiyadaasi waxay hoos imaanayaan guddi hoosaadka maamulka degmada ee Hanuuninta iyo Waxbarashada u qaabilسان;
- 3. Guddiyada bulshada Danwadaagta waxay ka kooban yihiin:-

B. Xubin: waxay ka kooban tahay (qoys. waana qaybta ugu yar ee danwadaagta oo maamul chaqaale iyo bulsho loo cuskan karo. Waxaana maamula guddi ka kooban 7 ruux oo u madax yahay Dadshid. Xubintu waxay leedahay guddiyo hoosaad oo la mid ah kuwa na tilmaaman qod. 18aad ee Xeerkhan oo ay hoos imaanayaan. Waxaa na madax ka noqonaya liixa xubnood ee guddiga xubinta wehelisa madaxa xubinta (dabshid).

T. Cudud: Shantii xubnoodba waxay chisayaan Cudud (50 qoys) oo uu maamulo guddi 6 ruux ah oo uu madax u yahay Taaku-liyc.

J. Birjeex: Labadii cududood waxay chisayaan birjeex (100 qoys), oo maamula guddi ka kooban 3 qof oo uu guddoomiye u yahay Tala-wade.

X. Bulsho: Labadii bulshane waxay dhisayaan hal bulsho (30 qoys), waxaana maamulaya guddi ka kooban saddex ruux oo uu madax u yahay Bulsha-wade.

Kh. Beel: Waa heerka ugu sarreya ee qaybaha degmooyinka Beelaha Danwadaagta, waxayna ka koobantaa 400 qoys (Laba bulsho),

waxaana maamulaya guddi ka kooban 3 ruux oo uu madax u yahay Beelaha-wade.

Qod 21

(*Qaabka iyo waajibaadka Xubnaha degmada iyo Beelaha Danwadaagta*)

Guddoomiyaha guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaareynta Beelaha Danwadaagta ayaa ka soo saaraya wareegto faahfaahinaysa qaabka, waajibaadka iyo xubnaha guddiyada Hoosaadka degmada iyo guddiyada Beelaha Danwadaagta.

Qod. 22

(*Tacab-qabsashada Danwadaagta*)

1. Iydaoo qofka danwadaagta ah uu ku leeyahay (share) hantida danwadaagta ay dhalinayso, haddana waa irruu ka helaa hawl kasta uu qabtaa abaalmarin aan ka yarayn 10% (boqolkii ba tobani), waxa uu chaliye qimahood'a.

2. Guddiga Sare ee Dejinta iyo Mashruucyada Barwaareynta Beelaha danwadaagta ayaa caddayn ku saabsan dhaqan gelinta arrintaaas soo saari doona.

3. Ddaka maatada ah (duqeyda, carruurta iyo kuwa jiran) oo aan hawlgalka ahayn waxay xaq u leeyihiin daryeelka ku xusan sharciga 14 ee 9.5.1976, qodobka 3aad, xarafka (d).

Qod.23

Mushaharka iyo gunnooyinka Maareeyaha Guud

Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha

1. Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha waaxyaha iyo shaqaalaha waxaa lagu dhaqayaa (xagga mushaharka iyo gunnooyinka Xeerka lr. 74 ee 22 Abril, 1972).

2. Guddiga Kormeerka waxaa lagu dhaqaayaa (xagga mushaharka iyo gunnooyinka) habka Hantidhowrka Guud ee ku xusan Xeerka L 2 ee 15.1.1976,

Qod. 24

Tirtirid

Wixii ka soo horjeeda ama aan la socon karin xeerkani was la tirtirayaas.

Qod. 25

dhan gal

Xeerkan wuxuu dhan gelayaa marka laga billaabo 1ca Jannaayo, 1976. Muqdisho, 20 Giu, 1976

GUDDONSHAH A G. S. Kacaanka
Jaalle S/Gaas Maxamad Siyaad Barre

G/le Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar
Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Dejinta
iyo Mashruucyada Barwaqeynta Beelaha

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

Diiwaanka Lam. 1 Bogga Lam. 102

Muqdisho 10 Juunyo 76,

Hantidhowrka Guud

(G/le Dhexe Abdullaahi Warsame Nuur)

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD.

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caaddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xasan Nuur Xasan maalintii 5.9.59 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmac'a Waaberi qaabkiisuna ahaa trabeesiyyodaale addimihiisuna ahaayeen $76 + 100 \times 56 : 2$ kuna fadhiya $4840 / =$ mdh., loona qaaday danta guud looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada H. Wadaag Jidka H. Wadaag sidaa aawadeed naacadii hore loogu soo diray war-qadda lambarkeedu yahay 1013136 ee $24.6.60$ oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada H. Wadaag Jidka H. Wadaag qaabkiisuna waa rektangolar aadimihiisuna yihiiin 80×30 kuna fadhiya $2400 / =$ mdh; soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:-

Woqooyi waxaa ka xiga: Maxamad Nuur Guutaale.

Koonfur waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga Axmad Xaaji Xuseen.

Muqdisho 27.9.76,

Agaasimaha Waxda Dhismaha iyo Dhulka

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Bashiir Xuseen Ibraahim maalintii 15.11.61 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hogan qaabkiisuna ahaa 30×11 , golar addimihiisuna ahaayeen $30 \times 13,50$ kuna fadhiya $405/ =$ mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 437328 ee 10.4.63 oo kabaxday fafiiskaan waxay isu beddeshay siida hoos ku tilmaaman:-

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektangolar addimihiisuna yihiin 40×30 kuna fadhiya $1200/ =$ mdh; soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:-

Waqooyi waxaa ka xiga: Daddo.

Kuunfur waxaa ka xiga: Dhul Lam. 877 iyo 878.

Galbeed waxaa ka xiga Dhul Lam. 867.

Bari waxaa ka xiga Dhul Lam. 870.

Muqdisho 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 343

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Axmad Jaamac Xasan maalintii 5.11.67 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan 7Km, qaabkiisuna ahaa rektangolar addimihilisuna ahaa yeen 60×50 kuna fadhiya $300/ =$ mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal degmada Yaaq-Shiid Jidka sidaas awadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkee-uu ahaa MWD 1631.1247.68 ee 7.7.68 oo kabaxday xafiiskaan waxay isu beddeshay siča hoos ku tilmaaman:-

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektangolar addimihisu yihin 30×20 kuna fadhiya $600/ =$ mdh; sooh-dimihiisuna waa sida hoos ku qoran:-

Waqqooyi waxaa ka xiga: dhul Lam. 638.-

Koonfur Waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed Waxaa ka Xiga dhul Lam. 643.

Bari Waxaa ka Xiga Waddo.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 344

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

MUQDISHO

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Aeemad Jaamac Xasan maalintii 5.11.67 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan 7Km. qaabkiisuna ahay rektangolar alddimihiiisuna ahaayeen 60×50 kuna fadhiya 300/= mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray war-
rda lambarkeedu ahaa MWD 1639.1246.68 ee 7.7.68 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Dhulka looga beddelay dhulkii looga qaaday danta guuc, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektangolar addimihiiisuna yihiiin 30×20 kuna fadhiya 600/= mdh; soohdimihiiisuna waa siça hoos kuqoran:

Wcqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga duhl Lam. 651.

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga dhul Lam. 646.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L.345

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Cali Faarax maalintii 21.7.62 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmac'a Wadajir qaabkiisuna ahaa rektagolar addimihiisuna ahaayeen 80×36 kuna fadhiya $2880/ =$ mdh; looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-shiid Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD ee $1.12.68.00$ ka baxday xafiiskaan waxay isu bedgeshay sida hoos kutilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu Muqdisho degmac'a Yaaq-Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektagolar addimihiisu yihiiin 30×20 kuna fadhiya $600/ =$ mdh; sooh-dimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam.800.

Koonfur waxaa kaxiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga Dhul Lam. 806.

Bari waxaa ka xiga Dhul Lam. 806.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 346

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdullaahi Cabdi Camalow maalintii 27.8.62 loona oggolaaday ookuyiil Muqdisho degmada Wadajir qaabkiisuna ahaa rektangolar addimihiiisuna ahaayeen 80×36 kuna fadhiya 2880 mdh; looga qaaday danta guud; looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD 880.766.68 ee 27.5.68 oo ka baxday xafiiskaan isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektangolar addimihiiisu yihiin 30×20 kuna fadhiy 600 mdh; soohdimihiiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 799.

Koonfur waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga Dhul Lam. 807.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 347

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA
MUQDISHO

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xallima Shiikh Ibrilhim maalintii 3.10.67 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan Jidka uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolar addiimihiisuna ahaayeen 60×50 kuna fadhiya 3000 mdh; sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray wargadda Lambarkeedu ahaa 1465.2245.68 ee 21.9.68 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi abaan dhulka haatan la siin karo Jaalahaas qaabkiisu waa rektangolar addiimihiisuna yihiiin 25×40 kuna fadhiya 1000 mdh. soohdimihiisna yihiiin sida soo socota:

Woqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga Shariif Muumin G.L. 1038.63.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 348

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynaya in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Aw Axmad Ibraahim Afrax iyo Cabdulle Macallin Cali maalintii 8.3.66 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Shibis Jidka Baicad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektagolar addimihii-suna ahaayeen 30×24 kuna kuna fadhiya 720 mdh, sababtoo ah in laga jaray Waddo.

Sidaas aawaadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lamberkeedu ahaa 932502 ee 4.6.66 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallahaas qaabkiisu waa Afargees siman addimihii-su yihiin 24×24 kunafachiyaa 576 mdh.

siihdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Woqoyi waxaa ka xiga Waddo.

Koonfur waxaa kaxiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga Waddo.

Bari waxaa ka xiga Waddo.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L.349

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA
MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Ardo Dirir Cusmaan maalintii 28.7.60 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wardhiigley Jidka Sh. Calawi uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Afargeesle addimihiiisuna ahaayeen kuna fadhiya 1292 mdh, sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeeduahaa 10 16433 ee 10.11.60 kara baxday xafiiskaan, waxay isu bed-ceshav sida hoos ku tilmaaman:

Rasm ahaan dhulka haatan la siin karò Jaallahaas qaabkiisu waa Trabeesiyo arddimihiiisu yihin 29;27, 50 X 28,40;2 kuna fadhiya 802,-30 mdh, soohdimihiiisuna yihin sida soo socota:

Woqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga Maxamad Xaaji Muriidi 253.68

Golbeed waxaa ka xiga Maryan Muuse Mataan 656/60.

Bari waxaa kaxiga Maryan Faarax.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 353

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caaddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faarax Xasan Cabdi maalintaa 21.7.62 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wadajir qaabkiisuna ahaa rektangolar addimihiiisuna ahaa-yeen 80×36 kuna fadhiya 2880 mdh, looga qaaday danta guud, looguna beddelay Idhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka sidaa aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeeddu ahaa WM. 3.23.765 ee 19.8.72 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq-Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektangolar addimihiiisu yihiiin 30×20 kuna fadhiya 500 mdh; soohdimihiiisuna waa sida hoos ku qoran:

Wcqooyi waxaa ka xiga: Waddada 21 Oktoobar.

Koonfur waxaa ka xiga Dhul lam. 807.

Galbeed waxaa ka xiga Dhul lam. 799.

Bari waxaa ka xiga Dhul lam. 801.

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 351

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la cadoeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cali Cabdi Camalow maalintii loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wadajir qaabkiisuna ahaa rektangolar addimihiiusuna ahaaseen 80×36 kuma fadhiya 2880 mdh. looga qaad'ay canta guud, looguna beddelay dhul kale oo kuyaal Muqdisho degmada Yaay—Shiid Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD 877.765 28.5.68 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku qoran:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaad'ay danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Yaaq—Shiid Jidka qaabkiisuna waa rektangolar addimihiiusii yihin 40×30 kuma fadhiya 1200 mdh; soohdimihiiusuna waa sida hoos ku qoran:

Woqooyi waxaa ka xiga: Waddada 21 oktoobar.

Kuunsur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa kaxiga dhul Lam. 800 iyo 807.

Bari waxaa ka xiga Dhul Lam. 802 iyo 809

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 352

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

MUQDISHO

B E D D E L A A D N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Shariif Muumin Shariif Nuur maalintii 14.1263 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmaad Hodan Jidka uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisuahaa rektangolar addimihiisuna ahaayeen 50×30 kuna fadhiya 1500 mdh, sababtoo ah in uu is beddelay qorshiihii meeshaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambareeu ahaa 545036 ee 4.1.64 kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaalahaas qaabkiisu waa rektangolar addimihiisu yihiiin 40×25 kuna fadhiya 1000 mdh. soohdimihiisuna yihiiin sida soo socota:

Woqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga Gal Lam. 1456/67

Bari waxaa ka xiga: Gal Lam. 366/59

Muqdisho, 27 Set 1976

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 350

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

Lam. 13/76.

HADDUU: ARKAY dacwadda kor ku qoran;

MARKUU: ARKAY arkay waxay ku saasan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDU: ARKAY Qodobka 69 D..L.9.9.65 N. 2; iyo Lumidda Jeegga wareega Lam. 097502 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta Hargeysa, kuna qoran tahay lacag 1Sh.S0. 10.000 jeeggaas oo ku qoran Dahabo Rooble Cawaale.

MUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysliyo jeeg Wareega kaddib markii ay ka soo wareego to 15 maalmood maalinta dekeretada lagu qoro faafinta Rasmigta ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Dahabo Raable Cawaale, ama qof isla asaga ka sita Wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 15ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Hargeysa, 1 Luulyo 1976

Dr. Yuusuf Aadan Faarax

K/S. Guud. Maxkamadda Gobolka Horgeysa

L.353 / Bis